

Ogeysiinta macaamilka

Isbeddelka dheeraadka degmada ee taageerada guri ku hayntu waa laga billaabo 1.6.2021.

Guddiga waxbarashada iyo barbaarinta ayaa waxay kulankoodi dhacay 15.12.2020 ku go'aamiyeen in laga billaabo 1.6.2021 dheeraadka Helsinki ee taageerada guri ku haynta lagu koobo carruurta kayar 1 sano.

Dheeraadka Helsinki ee taageerada guri ku haynta waxaa laga billaabo 1.6.2021 laga joojinayaa carruurta 1 sano buuxisa.

Dheeraadka Helsinki ee taageerada guri ku haynta waxaa laga billaabo 1.6.2021 lagu bixinayaa carruurta 1 sano kayar 264 bishi.

Ogolaanshaha taageerada guri ku haynta

Taageerada guri ku haynta waxaa codsan kara qoyska uu cunuggooda 3 saddex sano kayar uu guriga ku hayo waalidku, qof ay waalidka ama mas'uulka cunugga wada noolyhiin ama ay isqabaan oo la deggan, qof kale oo cunugga haya ama daryeele la shaqaaleeyay. Bixinta taageerada guri ku hayntu waxay dhammaanaysaa ugu dambayn, marka uu cunugga qoyska ugu yar buuxiyo 3 sano.

Maclumaadka ku saabsan taageerada guri ku haynta waxaa laga helayaa www.kela.fi/kotihoidontuki iyo www.hel.fi/homecareallowance

Taageerada guri ku hayntu waxay ka koobantahay qaybo sharci ku salaysan (lacagta haynta iyo dheeraadka haynta) iyo dheeraadka degmada (dheeraadka Helsinki)

- Lacagta haynta ee cunugga kayar 3 sano kuna jira guri ku haynta waa 342,95 yuuro/bishi, waxaa intaas dheer walaalada cunugga ee 3 sano kayar kuna jira guri ku haynta waxaa laga bixinayaa lacagta oo ah 102,67 yuuro walaalada 3 sano ka weyn ee kayar da'da dugsigana waxaa laga bixinayaa 65,97 yuuro.
- Dheeraadka haynta ee dakhliga ku salaysan waa 0-183,53 yuuro/bishi. Dheeraadka hayntu waa mid qoyska u gaar ah waxaan laga bixinayaa hal cunug oo kale.
- Waxaa intaas dheer oo ay degmadu bixin kartaa dheeraadka degmada. Dheeraadka Helsinki waxaa laga bixinayaa cunugga qoyska ugu yar oo kaliya, kaas oo laga bixiyo taageerada guri ku haynta.
- **Isbeddelka dheeraadka Helsinki:** Dheeraadka Helsinki waxaa **laga billaabo 1.6.2021** laga bixinayaa 264 yuuro/bishi **carruurta 1 sano kayar.** Laga billaabo 1.6.2021 dheeraadka Helsinki lagama bixinayo carruurta buuxisay 1 sano.

Codsashada taageerada

Taageerada guri ku haynta iyo dheeraadka Helsinki waxaa Kelada looga codsanayaa qaab elektroonig ah ama foomka WH1. Tilmaanbixinnada codsashada taageerada www.kela.fi/kotihoidontuki

Codsashada booska barbaarin-horaadka

Booska barbaarin-horaadka waxaa la codsadaa ugu dambayn afar bilood kahor inta aan booska loo baahan ama islamarka baahida booska la ogaado. Waxyaabaha la kala dooran karo ee barbaarin-horaadka iyo codsashada waxaad ka baran kartaa islamarkaasna aad booska barbaarin-horaadka degamada si elektroonig ah uga codsan kartaa <https://www.hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/paivahoido/paivahoidon-vaihtoehdot/> iyo asiointi.hel.fi

**Helsinki
Helsingfors**

waxbarasho-horaadka

Barbaarinta iyo waxbarashada
Barbaarin-horaadka iyo

Satu Järvenkallas
Maamulaha barbaarin-horaadka